

Is-Diiwaangali. Ballan qabso. Tallaalka qaado.

Qof kasta oo ku nool, ka shaqeynaya ama wax ka baranaya
British Kolombiya wuxuu heli karaa tallaalka caabuqa KOOFID-19.

Hadda isku diiwaangali tallaalkaaga **LACAG LA'AANTA AH** ee
caabuqa KOOFID-19.

**Ka qeyb qaado in aan iska soo afjarno cudurka
safmarenka ah.**

Wixii xogo dheeraad ah ka ogow bartaan.

fraserhealth.ca/vaccine

#BCimmUNITY

#BCCommunityImmunity



Waxaad raacdaa saddexdaan tallaabo ee fudud:

1. Waxaad iska diiwaangalisaa khadka internetka, telefoonka ama qof ahaan u tag

- Iska diiwaangali khadka Internetka: gov.bc.ca/getvaccinated.
- Iska diiwaangali telefoonka: 1-833-838-2323 (Waa lacag la'aan).
- Turjumaano waa la heli karaa. Markaad wacdid sug inta turjumaanku khadka ka soo galayo.
- Iska diiwaangali qof ahaan: booqo xarunta Adeegga Biritish Kolombiya (Service BC) ee kuugu dhow.

Qof kasta oo ku nool, ka shaqeynaya ama wax ka baranaya Biritish Kolombiya wuxuu heli karaa tallaalka caabuqa KOOFID-19 oo lacag la'aan ah. Uma baahnid in aad leedahay Lambarka Caafimaadka Gaarka ah (Personal Health Number) ama Kaarka Adeegyada Biritish Kolombiya (BC Services Card). Tallaalka si aad u qaadatid uma baahnid in aad leedahay sharciga Dhalashada Kanada ama degganaanshada rasmiga ah.

2. Ballan qabso

Markaad is-diiwaangalisid ka bacdi, waa lagu la soo xiriiri doonaa si aad u qabsatid ballanta tallaalka sida ugu dhakhso badan markaad haq u yeelatid. Waxaad ballantaada ka qabsan doontaa khadka internetka ama telefoon. Waxaad dooran doontaa goobta, taariikhda iyo wakhtiga.

3. Tallaalka qaado

Booqo rugta tallaalka si aad u soo qaadatid tallaalkaaga.

#BCimmUNITY

#BCCommunityImmunity



[Somali]